

Healthy smiles Ontario

Barnaamij bilaa-kharash ah oo caafimaadka ilkaha ah looguna talagalay carruurta 17 jirka iyo waxa ka yar ah.

Waa maxay Dhoollo-Caddaynta Caafimaadka leh ee Ontario (Healthy smiles Ontario)?

Dhoollo-Caddaynta Caafimaadka leh (Healthy smiles Ontario) ee Ontario waa barnaamij cusub oo loogu talagalay carruurta da'doodu 17 iyo waxa ka yar ah ee aan marinka u haysan nooc kasta oo hoos yimaad caymis ilkaha ah. Haddii aad u-qalanto, carruurtaada ayaa heli doona adeegyo caafimaadka ilkaha oo joogto ah iyada oo aan wax kharash ah adiga kuugu kicin.

Ayaa u qalma?

Carruurta da'doodu 17 iyo waxa ka yar ah ayaa u-qalmi doona haddii:

- Ay yihiin deggenayaal Ontario;
- Xubin ka yihiin reer leh Dakhli Qoys Saafi La-Isku-Toosiyay oo ah \$20,000 am wax ka hooseeya; iyo
- Ayna marin u lahayn nooc kasta oo hoos imaad caymis ilkaha ah (oo ay ka midka yihiin barnaamijyo kale oo dowladdu bixiso, sida Ontario Works).

Si aad wax dheeraad ah uga ogaato arrimaha ku saabsan shuruudaha u-qalmitaanka ee Dhoollo-Caddaynta Caafimaadka leh ee Ontario (Healthy smiles Ontario) iyo dukumentiyada loogu baahan yahay xaqijinta u-qalmitaanka, u wac Adeegga Ontario KHADKA-macluumaadka taleefanka lacag la'aanta ah 1-866-532-3161 (TTY taleefanka lacag la'aanta ah ee 1-800-387-5559), ama la xiriir xubinta caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga. Liis ay ku qoran yihiin xubnaha caafimaadka dadweynaha ayaa laga heli karaa ontario.ca/healthysmiles.

Sideen u codsadaa?

Waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto xubinta caafimaadka dadweyne ee agagaarkaaga. Xubinta caafimaadka dadweyne ee agagaarkaaga ayaa kaa caawin doona qaabsocodka codsiga, oo ay ka midka yihiin buuxinta foomka iyo tusitaanka dukumentiyada loo baahan yahay.

Maxaa adeegyo ah ee hoos yimaad barnaamijka?

- Booqashooyinka caadiga ah ee loogu tago bixiye caafimaadka ilkaha, ee ay ka midka yihiin dhakhtarka ilkaha ama xirfadlaha nadaafadda ilkaha
- Nadiifin

- Buuxin
- Raajato
- Ka xaquuqa wasqda
- Iyo wax ka sii badan

Maxaa adeegyo ah oo aan hoos iman barnaamijka?

- Ilko qurxinta, ay ka midka yihiin ilko caddaynta
- Ilko toosinta, sida biro galinta
- Daryeelka caafimaadka afka ee degdegga ah

Haddii ilmahaagu u ka yaryahay da'ada 17 oo u qabo xaalad caafimaad afka ah oo dakhso ama degdeg ah, adeegga ayaa laga yaabaa in u hoos yimaad barnaamijka Carruurta U-Baahan Daaweynta (Children in Need of Treatment - CINOT). Fadlan la xiriir xubinta caafimaadka dadweyne ee agagaarkaaga ama tag ontario.ca/cinot si aad uga ogaato wax dheeraad ah .

Halkee ayuu ilmahaagu marin uga heli karaa daryeelka ilkaha iyada oo ah qayb ka tirsan Dhoollo-Caddaynta Caafimaadka leh (Healthy smiles Ontario)?

Marka qaabsocodka codsiga la dhammaystiro, xubinta caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga ayaa adiga ku wargalin doona adeegga ilkaha laga heli karo beeshaada ee la kala dooran karo. Kuwan waxa ku jiri kara bixiyeyaasha meheradaha gaarka loo leeyahay iyo/ama xubinta caafimaadka dadweynaha ama rugta caafimaadka ilkaha ee, beesha kolba iyada oo ku xiran meesha aad ku nooshahay.

Ilmahagu ma u tagi karaa dhakhtarkayga ilkaha?

Ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu ku sii wato inuu u tago dhakhtarkaaga ilkaha haddii u isagu ama iyadu ay ka qaybqaadato barnaamijka Dhoollo-Caddaynta Caafimaadka leh (Healthy smiles Ontario). Haddii uuna dhakhtarkaaga ilkuhu ka qaybqaadan barnaamijka, waxaad la xiriiri kartaa dhakhtarka ilkaha madax-bannaan ama xirfadle nadaafadda ilkaha oo agagaarkaaga laga helo sidii aad u ogaan lahayd inuu isagu ama iyadu u ka qaybqaato barnaamijka.